

Caddaynta Sharci fulinta Fiisaha U ama T

Waaxda Booliska Seattle waxa uu ballan ku qaadayaa ilaalinta iyo u adeegida dhammaan dhibanayaasha dembiga, iyaddoon loo eegin heerkooda muwaadinimada, caddaymaha ama kartida luqadda. Waa xeerka Waaxda Booliska Seattle inay ilaaliso muhaajiriinta inay helaan ilaalinta booliska iyo adeegyada dad waynaha.

Fiisaha U waa fiise ku meel gaadh ah oo oggolaanaya ilaalinta socdaalka ee dhibanaha dembiya loo qalmo kuwaas oo aad u caawiyay sharci fulinta ogaanshaha, baadhitaanka ama dacwad oogista hawl fal dembi ah. T-visas waxa uu bixiyaa dheefaha socdaalka ee dhibanayaasha ka ganacsiga dadka.

Codsiga buuxa ee fiisaha U ama T waa inuu ku jiraa foomka caddaynta sharci fulinta saxeexan (Form I-918B) ee ka soo baxday wakaalada sharci fulinta halka dembigu ka dhacay. Foomka caddaynta waxa uu xaqiijiyaa la shaqaynta dhibanaha ee baadhitaanka sharci fulinta. Iyaddoon lahayn caddaynta sharci fulinta, U-Visa waa la diidi doonaa.

Haddii shilka(lalka) ka dhacaan gudaha xadadka magaalada Seattle, codsabayaashu waxay soo gudbin karaan caddaymahooda la dhammaystiray ee I-918 wixii caddayn ku socota Waaxda Booliska Seattle. Waaxda Booliska Seattle ma siiso ama ma damaana qaado fiisaha U ama sharciga socdaalka iyaddoo la saxeexayo caddaynta sharci fulinta. Keliya USCIS (qaybta federaalka ee DHS ee ka masuulka ah oggolaanshaha iyo diidista dheefaha socdaalka iyo heerkarta sharciga) way bixin kartaa ama diidi kartaa fiisaha U ka dib dib u eegida buuxda ee codisga.

Si waafaqsan [SHB 1022](#), Waaxda booliska Seattle waxay ka jawaabi doontaa codsiyada foomamka caddaynta sharci fulinta wixii ah Fiisayaasha U iyo T:

- Marka go'aanka la oggolaado, Waaxda Booliska Seattle (SPD) si buuxda waxay u dhammaystiri doonaan oo u saxeexi doonaan caddaynta sharci fulinta, ay ku jirto, haddii ay habboontahay, faahfaahinta gaarka ah ee ku saabsan sifada dembiga la baadhay iyo sharaxa faahfaahsan ee caawimada uu diyaarka u yahay dhibaha ama caawimada uu la diyaarka ahaa ee dhici karta baadhitaanka hawsha falka dembiyeed.
- SPD waxay habbayn doontaa caddaynta gudaha sagaashan maalmood oo codsiga ah iyaddoo dhibanaha uu ku jiro laanta socdaalka federaaliga 5 dacwadood oo ka saarida mooyee, xaalad kastaba SPD waxay soo saari doontaa caddaynta wakhti aan ka dambayn afar iyo toban maalmood ka dib codsiga marka la helay.
- SPD ma shaacin doonto macluumaadka aqoonsiga gaark aah, ama macluumaadka ku saabsan muwaadinimada ama heerkarta sharciga socdaalka dhibane kasta ee hawl kasta oo fal dembiyeed ama ka ganacsiga dadka kuwaas oo codsanaya caddaynta.

Macluumaadka dheeraadka ah ee nidaamka foomamka loo baahan yahay, fadlan booqo,

<http://www.uscis.gov/i-918>

U gudbi [codsiyada](#) cinwaanka soo socda:

Waaxda Booliska Seattle

Digtoon: (Waaxda Sharciga) Legal Unit

610 5th Ave, PO Box 34986

Seattle, WA 98124

Iimayl: SPD_LegalUnit_UVisa@seattle.gov

Marka SPD Qaybta Sharciga ay heshay qoraalka codsigaaga, Qaybta Sharciga SPD waxay kuu soo diri doontaa wada xidhiidhka kaas oo 1) xaqiijin doona qoraalada codsigaaga in ay heshay Waaxdu iyo 2) ku siin doontaa taariikhda jawaabta la qiyaasay.

Su'aalaha? La xidhiidh qaybta sharciga SPD lambarka 206-233-0053

Wixii ah caawimada U-Visa ama T-Visa nidaamka codsiga la xidhiidh Mashruuca Xuquuqaha Qofka Muhaajirka ah ee Waqooyi galbeed. <https://www.nwirp.org/get-help/>.